

Risaalada Bukaanka

Somali Lisani Hastalar Risalesi

Qoraa: Bediüzzaman Said Nursi

Tarjume: DAUD ABDULLAHI

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِیْمِ

الَّذِينَ إِذَا أَصَابَتْهُمُ مُصِیْبَةٌ قَالُوا إِنَّا لِلّٰهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ *
وَالَّذِي هُوَ يُطْعِمُنِي وَيَسْقِينِ * وَإِذَا مَرِضْتُ فَهُوَ يَشْفِينِ

fariintani dadka dhibaataada soo gaartay iyo dadka xanuunsanaya say ugu noqoto daawo iyo xanuun baabi'e wax tara darteed baa loo qoray. Waxayna ka koobantahay shan iyo labaatan daawood.

DAAWADA KOOWAAD

Bukaanka Maciinka'oo!

Wal-walka iska dhaaf, adkayso. waxaa laga yaabaa xanuunka ku haya in uu dhib kugu ahayn bil caksi in uu wax ku taro. Maxaa yeelay cumrigu waa kayd, wuu dhammadaa. Hadii uusan miro lahayn waa khasaaro. Rayn-rayn iyo moogaansho hadaad ku jirtidna dhaqso ayuu cumrigu u dhammadaa. Xanuunku kaydka noloshaada ah ayuu wuxuu ka dhigaa mid mirodhal ah. Sidoo kale wuxuu ka dhigaa nolsha mid dheeraato inta ay ka miro

dhalayso. Xunuunku in uu cimriga mid dheer u badalo waxaa jirto tusaale ama maah-maah caan ah oo tiraahda. “ waqtiga abaarta iyo musiibada wuu dheraadaa, waqtiga barwaaqadana wuu gaabtaa.”

DAAWADA LABAAD

Bukaanka Sabarla'oo!

U sabir xitaa u mahad celi cudurka. Xanuunkan hada ku haya, cumrigaada daqiiqadihiisa wuxuu u badayalaa saacado cibaado ah. Maxaa yeelay cibaaddadu waa laba qayb. Qaybi waa soonka iyo salaadda iyo kuwa la mid ah. Qaybta labaadna waa sabarka aan muujinno marka xanuunadda iyo musiibooyinka la midka ahna nagu dhacaan waxayna qofka lagu ibtileeyo tusaysaa; awooddarida iyo nusqaantiisa , dabadeed qofka la ibtileeyey wuxuu u cararaa xage Alle si dhabahna ugu dhibsheegtaa, waxay u noqotaa cibaado macnawi ah lagana ajarsiiyo.

Haa, nolol badankeeda xanuun uu joogteeyey, haddii aysan sheegasho la jirin qofka mu'minka ah in cibaado ajarkeeda oo kale laga siinayo waxaa ku soo aroortay axaadiis saxiix ah. Xitaa mu'miniinta

qaar bukaanka ah ee sabra Allana u mahad naqa,
daqiiqadkasta oo ay xanuunsanayeen hal saac
cibaado ajarkeeda lasiiyo ayaa soo aroortay, qaar
ka mid ahina maalin cibaado ah. Xanuunka hal
daqiiqo noloshaada ka mid ah kun daqiiqo
qiimeheeda inta u yeelo nolol dheer ku siiyey
sheegasho ma mudno wuxuu mudanyahay mahad
naq.

DAAWADA SADDEXAAD

Bukaanka Adkeysiga yaroow !

Dadku dunida raaxo iyo rayn-rayn in aysan u iman
waxaa ku tusaya , si joogto ah dadkii joogay oo
baxaya iyo dhalinyaradii oo duqoobaysa, kala tag
aan dib isugu soo laabasho lahayn.

Sidookale dadku, noolaha oo dhan waa midka
dhinackastaba ugu sareeyo, booska madaxwaynaha
asaga oo joogo, wuxuu ka fakaraa waqtiga la soo
dhaafay rayn-rayntiisa iyo waqtiga soo socda
musooboyinka qabsandoona taasina waxay
sababaysaa nolol mida xoolaha ka hooseysa,
murug iyo tiiranyo leh.

Dadku dunida nolol wacan oo rayn-rayn leh in ayku nooladaan looma soo dirin. Waxaa laga yaabaa qof hanti aad u badan gacanta ku haya, aduunyada ganacsi uu ka sameyo ganacsigaas oo siin doona nolol rayn-raynleh dhamaadna aan lahayn. Gacanta hantida ugu jirta waa cumrigiisa. Hadii xanuun uu san jirin cafimaadku wuxuu sababaa mogaan. Aduunyadana wuxuu u tusaa qaab wanaagsan, akhirona wuu halmaamsiini. Dabadeedna qabri iyo dhimasho ma is xasuusinayo. Hantida la siiyey oo cumrigiisa ahna wuxuu ku baabi'naa qaarka mid ah waxyaba uu jecelyahay oon macnaba lahayn. Lakiin xanuunka wuxuu furaa indhihiisa, wuxuuna jirkiisa iyo korkiisa ku dhahaa “ qof aan dhimaneyn matihid, dheeldheel laguuma abuurin, waxaa lagu dhiibay shaqo. Islawaynida jooji. Rabbiga ku abuuray xasuuso, qabri in aad galayso ogow iskuna diyaar gareey.”

Saas darteed xanuunka hadii saas loo fiiriyo waa dardaaran aan ku sireynin, waa wadda-tuse kuu digaya. In aad ka sheegato maaha ee waa in aad

umahad celiso. Hadduu kugu cuslaadana waa in aad u adkaysato.

DAAWADA AFARAAD

Bukaanka eeda sheeganayoow!

waxa kugu haboon eed sheegasho maaha waa mahad naq, sabar. Maxaa yeelay jirkaaga iyo xibnahaadaba adiga malihid. jirkana maadan abuurin, meelna kama aadan soo iibsana. Taas waxay tusaysaa in laleeyahay. Jirkaaga iyo xubnahaada milkiilihii lahaa sida uu doonayo ayuu ka yeeli.

Tusaale ahaan qof hodan ah oo xirfad sareysa leh haddii uu ubaahdo hodontinimadiisa iyo xirfadiisa inuu soo bandhigo isagoo adeegsanaya qof uu dhar aad quruxbadan u xiray say dadku u arkaan, mudo hal saac ahna kula heshiiyey in uu xirto.

Mudadaasna lacagteeda siiyey. Ninka xirfadlaha maadama dharka asaga uu leeyayahay wuu gaabina wuu dheereynaa sida uu rabo o oku haboon ayuu ka yeelaa. Nin faqiirka ah inta dharka lagu cabiraayo oo loogalinaayo hadii uu dhaho “

waxaad imariday dhib, mar kac mar fariiso mar foraarso, sidoo kale marada aad jartay markay dheered ayay igu qurxoonaayd hada waad ku dheeshay'' in uu dhaho ma mudanyahay? Waad naxariis la'dahay waadna caddaalad darantahay ma dhihikaraa?

Saas lamidna miisalka oo kale qofka xanunsanoow Alle si uu awoodisa iyo xirfadiisa ku muujiyo wuxuu indho, dhago iyo caqliba ku sharaxay jirkaaga . magacyadiisa wanaaga badan in uu ku baro, ku tusiyo daraadeena jirkaaga ayuu xaalad ka badalo xaaladkale ka dhigaa. Sia aad marka aad baahiyooto magaciisa Al-rasaaq uu ku baray marka aad xanuunsato Al-shaafi magaciisa baro. Xanuunnada, musiibooyinka magacyada wanaagsan ee Alle macnohooda madaama ay tusayaan waxaa ku jirto xikmad iyo naxariis iyo wanaag aad u badan marka qofka xanuunsani daaha uu ka qaado waxaa meesha kabaxaya kalinimadiisi iyo cabsida uu qabay macnaha uu helayna wuxuu ka helaya daganaan.

DAAWADA SHANAAD

Bukaanka xanuunka lagu ibtaleyooow !

Wagtigan hadda la joogo tajrubo waxay i tustay cuduradda dadka qaar in ay ku dhacaan waxaytahay samaan iyo naxariis Alle u sameeyey dadkaas. Muddo sideed sagaal san oku dhawaat ah aniga oon mudaneyn ayaa dhalinyaro xanuunsanayo duco i waydiisten. Waxaan dareemay dhalinyaradaas haddii dhalinyarada kale loo fiiriyo in ay aqiradooda bilaabeen in ay ka fakaraan. Jahwareerka ilo sarqaanimadda dhalinta haysato maysan ka muuqanin. Waan fiirinaayey waxaana dareensiinaye xanuunka inta ay u adkaysan karaan in ay utahay asxaan Alle u galay waxaana dhihi jiray: “ walal, xanunkan ku haya lama jiro. Xanuunka ku haya dartiisana inta kuu qalbi jilco makuu dhimrin oo man ducaynin. Xanuunka inta uu moogiddaada iyo hurdada kaa kicino adkayso. cudurkan xanuunka kugu haayo marka uu howshiisa dhamaysto Allah ayaa cafimaad kus ii doono”

Waxaan kale oon dhihijirey: “ kuwo adiga kula mid ah hada caafimadka dhibka uu u keenay dartiis

waxay ku jiraan moogan, waxay ka tageen salaadi, waxaysan ka fakarin qabrigi, waxay halmaameen Allah, hal saac oo mac-macaanka aduunyada oo beenta ah darteed ayay nolol aan dhamaad lahayan ku baabi'yeen. Adigana xanuunkan ku haya ayaad qabriga iyo nolosha aqiro o oka danbaysa ayaad ku arkaysaa, waadna ka taxadaraysaa. Taas macnaheeda waxay tahay cudurka ku haya wuxuu ku yahay caafimad. Qaar kamid ah kuwa kula eгна caafimaadka wuxuu u yahay cudur.'’.

DAAWADA LIXAAD

Bukaanka Xanuunka ka sheeganayoow!

Adiga ayaan ku waydiinayaa, waxaad gadaal u fiiridaa maalmihii ku soo dhaafay kana fakartaa waqtigii barwaaqada ahaa rayn-raytana aad kusoo qaadatay iyo waqtigii dhibaataada iyo xanuunka lahaa kuna sabartay. Waxaad qalbiga ama carrabka ka dhaysaa alxamdulillah marna waxaad dhahaysaa shalaytadeydiyeey.

Waxaad eegtaa marka aad ka fakarto rafaadka kusoo maray oo alxamdulilah aad dhahdo waxaad dareemaysaa macaansi iyo qalbi-daganaan, maxaa

yeelay xanuunka dhamaadkiisa waxa uu lee yahay dhadhan macaan. Musiibooyinkaas iyo rafaadkaas dhamaadkooda wuxuu nafta ku reebaa saan iyo raad wacan oo marka aad soo xasuusatid aad raacdid Alle una mahad naqdid.

Marka aad soo xasuusato waqtigii ray-raynta lahaa hadana aad ka shalaysantahay, waqtigaas dhamaadkiisa wuxuu naftaada ku reebayaa raad xun markii aad soo gocotana xanuun iyo shalayto joogto ah kuu keenaya.

Maadaama hal maalin wax aan lagu bannayn macaansigoodu ku dhawaad sanad xanuun macnawi ah kuu keenayso, hal maalin gudaheedna cudurka xanuunkiisa sabar hadaad muujiso ayada oo abaal-marin lagaa siinayo sidaa oo kale xanuunka dhamaashadiisa iyo ka badbaadidiisa waxay kuu leedahay faraj iyo macaansi macnawi ah.

Cudurkani kumeel-gaarka ahi oo hadda ku haya abaal-marin in uu ku dhamaanayo ogow, waxaad dhahdaa “kani wuu i dhafayaa!” haka eed sheeganin, u mahad celi.

DAAWADA TODOBAAD

Bukaanka caafimaadka macaankisa waayayoow!

Xanuunka ku haya nicmada Alle caafimaadka kugu siiyey dhadhankeeda ma baabi'nayo, taa lidigeeda xanuunku nicmada dareenka dhadhankeeda ayuu badiyaa. Maxaa yeelay wuxu haday joogto yihiin qiimahooda lama dareemo. Xitaa dadka xikmadda iyo xaqiiqada u saaxiibka ah waxay isku raaceen oraahdaan:

إِنَّمَا الْأَشْيَاءُ تُعْرَفُ بِأَضْدَادِهَا

micnaheeduna yahay “walxaha waxaa lagu bartaa lidiyadooda.” Tusaale ahaan, mugdi hadii uu san jirin iftiin lama ogaan karilahayn, macnadaro ayuu noqon lahaa. Qaboow haddii uu san jirin kulayl lama garanlahayn, macno ma lahaan lahayn. Baahi haddii ay san jiri lahayn cunnada dhadhan malahaan lahayn. Caloosha hadaysan kuleylkeeda jiri lahayn biyo cabitaanka ma macaanaadeen. Xanuun hadii uu san jiri lahayn caafimaadka .dhadhan ma lahaadeen

Maadaadma Alle nuucyada naxariistiisa in aan dareenno iyo nuucyada nimcooyinkiisa in aan aragno iyo mar walba mahad celintiisa in uu nagu hagaajiyo darteeda waxa uu noo abuuray xaalado nimcooyinkiisa oo dhan aan ku dareemikno, sida cafimaadka uu noo siiyey silamid ah waxa uu nasiyey xanuunanda iyo cudurada.

Waxaad is weydiisaa: “ xanuunkani haddii uusan madaxa mise gacanta mise caloosha kaa hayn lahayn; adiga, madaxaaga, gacantaada, calooshaada marka ay caafimaad qabeen nimcada Alle ku siiyey inta dareento ma u mahad naqi lahayd? Waxaa hubaal ah mahad celin maahane xitaa in aadan xasuusan lahaynin saas darteedna aad foajignaan la’aan xumaanta iyo macaasida ugu isticmaali lahayd.”

DAAWADA SIDEEDAAD

Bukaanka aakhiradiisa ka fakarayoow!

Xanuunka sida saabuunta oo kale wasakhda wuu dhaqaa, nadiifiyaana. Xanuunadda danbitirtireyaal

in ay yihiin axaadiis saxiixa ah ayaa ku soo aroortay. Tusaale ahaan: “ geed mirihiisu bislaadeen marka la ruxo sida miruhu uga soo daataan oo kale ayaa qofka imaanka leh marka uu xanuunsanyahay danbiyadu uga daataan.”

Danbiyada, akhiro waxay noqondoonaan xanuun jooto ah. Nolosha aduunyada xitaa dunuubtu waxay sababaan xanuun qalbiga iyo nafta ku dhaca oo macnawi ah. Xanuunkan hadda ku haya hadii aad u sabartid oodan ka sheegan, xanuunkan kumeelgaarka ah waxaad uga badbaadi xanuun joogta ah.

Hadii aadan danbiyada ka fiirsan ama maalinta aakhiro aad moogtahay ama Allah aadan aaminsanayn, waxaad ku sugantahay xanuun aad u weyn kasoo xanuunka yar oo hadda ku haya malaayiin jeer ka weyn, kana xanuun badan. Xanuunkaas ka magangal kana carar.

Maxaa yeelay dunida waxkasta oo yaala waxaa la xariiro oo doonaya qalbigaada, naftaada iyo jirkaaga, xanuunkani wuxuu kaa jaraa rabitaankaada , maadaama aad aakhiro iyo nolosha dambe aadan aaminsaneyna dhimashada waxaad u

aragtaa xukun daldal ha noloshana soo afjaraya. Taasina waxay kuu keeneysaa aduunka oo kale in la mid ah oo cudurro iyo xanuuno in ay kugu dhacaan.

Marka kowaad saad xanuunka aadka u badan kassoo aduunka oo kale ah hadii aad doonaysid in aad la tacaashid rabtidna daawo lagu kalsoonyahay waa in aad imaankaaga wanaajisaa amintaana Allaha awooda leh caafimaadkana bixiyo.

Qofkii Alle aan aaminin dhibaato aduunyada la eg ayaa dhabarka u saaran. Qofka Alle aaminsanna daganaansho iyo farxad macnawi ah ayaa aduunyadiisa ka buuxdo. Inta iimaankiisu gaarsiisanyahay in la mid ah ayuuna dareema. Saas darteedna wuxuu helayaa adkaysi iyo sabar kadibna xanuunka ayaa kakala yaraado, sida barafka oo kale ayuu u dhalaalaa, wuuna baaba'aa.

DAAWADA SAGAALAAD

Bukaanka Allahii abuuray yaqaanayoow!

Cudurka; xanuunka iyo wehel-la'aanta iyo cabsida la socoto mararka qaar waxay sababikartaa geeri. Geerida, muqaalkeeda dibadda ah iyo dhinaca

moogaha hadii laga eego xanuunanda sababta u noqonkaro geerida aad bay cabsi iyo argagax gelinaysaa qofka.

Marka koowaad ogow oo si buuxda u aamin: “ajasha waa la qadaray, ismana badasho” badanaa dad caafimaad qabay kana dul barooranayay qof xanuun halis ah qaba iney dhinteen, dadki xanuunsanaa oo ay ka kor barooranayeena way caafimaadeen wayna ka kaceen.

Marka labaad: geeridu dhammaan dadka musiibo uma aha. Dadka imaanka leh waxa ay utahay:

Nasasho ayka nastaan culayska nolosha.

Dunidu waa madal imtixaan, imtixaanka diyarintiisuna waa cibaado. Waxaa u dhamaatay imtixaanki oo wayka gudbeen.

Dadkoodii iyo asxaabtoodii ay jeclaayeen oo aakhiro jiray ayay la kulmayaan.

Gurigoodii iyo aqalkoodii barwaaqada lahaa bay dagayaan.

Dunida dhibaatadeedii waxaay uga gudbayaan beeraha janada.

Waxay ugudbayaan abaalmarin iyo dheeraad xaga Alle lagu abaalmarindoono.

Haddii geerida xaqiiqdeeda dhabta ah ay qaabkan tahay ma mudna in laga fajaco oo laga baqo, bilcaksi waa in loo arko naxariis iyo tilaabo dhinaca barwaaqada loo qaaday. Dadka saalixiinta ah qaar ka mid ah geerida in ay ka baqaan waxa keeney rabitaan ayku rabaan in ay dunida joogaan dabadeedna camalkooda sii wanaajiyaan, inta ay noolyihiina samafalka badsadaan. Haa dadka iimaanka leh geeridu waxay u tahay iridka naxariista. Dadka aan iimaanka laheyn waxa ay utahay ceel mugdi ah guntiisuna dhamaad lahayn.

DAAWADA TOBANAAD

Bukaanka meel cidlo ah ka walwalayoow!

Xanuunka ku haya awoodisa iyo culayskiisa ayaad ka walwalaysaa. Walwalkaas, xanuunka ku haya ayuu kugu sii cuslaynayaa. Haddii aad rabtid xanuunka in uu kaa kala yaraado waa in aad ku dadaasho in aadan ka walwalin. Yacni xanuunka faaiidooyinkiisa iyo sawaabkiisa iyo in aad ka

kabsandoontid waa in aad ku fakartid. Walwalka jooji si aad xanuunka xididka ugu jartid.

Haa walwalka, halkii xanuunka waxa uu ka dhigaa labo; jirka xanuunkii ka jiray walwal markuu imaado waxaa bilowda xanuun macnawi ah; xanuunka jirka kan macnawiga ah ayuu cuksadaa, wuuna sii balaartaa. Haddii qofka xanuunsan tan Alle raali ku noqdo uuna talasaarto, xanuunkii macnawiga ahaa ayaa meesha ka baxa sidaas darteedna xanuunkii jirka ahaana kali ayuu noqdaa waxaana meesha ka baxa wixii uu ku taagnaa, markaas dib u gurad ayuu bilaabaa tobankiiba sagaal ayuu nusqaamaa.

Walwalka sida uu xanuunka uga daray si lamid ah naxariista Alle in laga quusto iyo eedsheegasho badan ayuu dhaliyaa. Taasina xanuunka ma anfacayso sida mahad naqa nimcada uu u badiyo oo kale sheegashaduna xanuunka si lamid ah bay u badisaa.

Sidoo kale walwalku asaga ayaaba xanuun gaar ah. Daawadiisuna waa xanuunka sababihiisa iyo faaiidooyinkiisa in la ogaado. Maadaama aad

xanuunka faaiidoyinkiisa garaney sid taas walwalka
kala hor tag **الحمد لله على كل حال**dhehna.

DAAWADA TOBAN IYO KOWAAD

Walaalkayga buka sabir la'aantuna heysoow!

Cudurka hadda ku haaya mudada hadda ah ayuu xanuun kugu hayaa, cudurradii hadda kahor aad ka kabsatay ku soo dhaafayna jirkaagoo ka reystay iyo sawaabka aad ka heshay ayaad ku faraxsantahy. Maanta xitaa saacadani laga bilaabo wax cudur ahi kuma hayaan, saas darteed cudur aan ku haynin xanuun kugu ma hayo; xanuun haddii uusan ku haynina murugo kuma hayso. Maadaama aad si xun shaki isku galisey darteed ayaa samir la'aanta kuu keeneyso.

Maxaa yeelay cudurradii maanta ka hor ku hayey maadaama ayku dhaafeen xanuunkoodiina inuu ka haro uma badna; meeshii aad farxad dareemi lahayd haddii aad xanuunkii ku dhaafay owgii murugo iyo samir la'aan aad dareemeysid taasi waa waali. Sidaa oo kale maalmaha soo socda weli maysan imaanin. Haddii aad hadda kasii fakartid xanuunka ku qaban doona weli maalin aan

imaanin, cudur aan imaanin, xanuun aan imaanin yacni saddex wax oon jirin kadibna samir la'aan iyo tiiraanyo aad isu sababtid taasuna waa waali kale.

Maadaama hadda ka hor waqtigii aad xanuunsaneed dhaafidiisa ay ku farxad gelineyso. Sidoo kalena hadda kadib waqtiga soo socdana weli aanan la gaarin, cudurkiisa iyo xanuunkiisana cidna eysan saadaalin karin, awoodda samirka uu Alle kugu deeqay ha iska beer dareynin.

DAAWADA TOBAN IYO LABAAD

Bukaanka cibaadadu seegtayoow!

Xadiis ayey ku sugantahay in qofka wanaagsan, xanuun dartiisna cibaadadii ay seegtay inta uu xanuunsanyahay cibaadadiisii ajarkeeda waa la siiyaa. Cibaadada waajibka ah inta uu samaynkaro sameeyo, sunooyinkii iyo wardiyadiisii kalena ajirkoodii ajirka xanuunka booskiisa ayaa buuxiya.

Sidoo kale xanuunku dadka waxa uu tusayaa dareensiinayaana in ay awood yaryihiin. Awood yaridaa daraadeen qofku si qarsoon iyo si muuqataba alle inuu u kaalma weydiisto ayey

keeneysaa. Maxaa yeelay alle dadka waxa uu la abuuray tabardari iyo baahi, si ay alle gargaar iyo maciinba u weydiistaan, una ducaystaan.

قُلْ مَا يَغْبُونَ بِكُمْ رَبِّي لَوْلَا دُعَاؤُكُمْ

Yacnii “haddii aysan ducadiinu jirin, waa maxay muhiimadiinu?” aayaddu waxa ay ishaareysaa maqsadka iyo danta loo abuuray dadka, oo ah in ay alle baryaan una cibaadaystaan. Maqsadku hadduu saas yahay qofku marka uu xanuunsanayo waa in uu alle baryo, maaha in uu sheegto waa in uu sidoo kale u mahad naqo. xanuunka marka uu ka bogsado kadibna waa in uu joogteeyo ducada maaha in uu ka tago.

DAAWADA TOBAN IYO SADDEXAAD

Qofka maciinka la’ cudurradana ka sheeganayoow!

Dadka qaar cudurku wuxuu ula midyahay fursad iyo hadiyo dhinaca Alle uga timid, bukaankastana waxa uu u fakarikaraa qaabkaas. Maadaama geerida waqtigeeda aan la ogeyn; Alle dadka si aysan rajobeel xad-dhaaf ah iyo halmaan qoto-dheer ugu dhicin, sidoo kale nolosha aduunyo

iyo tan aakhiro qaab cabsi iyo rajo leh si ay ugu shaqaystaan awgeed ayuu ajasha waqtigeeda u sheegin. Maadaama waqti kasta ajashu imaankarto, iloowsho asaga oo ku sugan haday imaato waxaa ka lumaysa nolosha aakhiro, si aysan taas u dhicin waxa alle noo soo diray cudduro iyo xanuuno iloowshaha iyo hurdada naga kiciya, aakhiro iyo ajasha nasoo xasuusiya si aan isu diyaarino darteed. Mararka qaar waxaa dhici karta heer baraarug aanan shan iyo labaatan sano aan kusoo gaarin, xanuun na qabtay awgii in aan labaatan bari gudahood kusoo gaarno.

Haddii aan soo aruuriyo hadalka: ardaydeyda waxaa ka mid ahaa laba dhalinyaro- Allaha u naxariisto- oo lakala dhihiyey Sabri iyo Mustafa, casharada dadka ku soo biira ayaga ayaa ugu dadaal badnaa uguna firfircoonaa, qalinna maysan haysan. Waxaan is weydiin jiray sababta ka danbaysa arrintooda. Markii Alle oofsaday ayaan waxa aan ogaaday in ay qabeen cudduro halis ah oo ay u dhinteen, taasina waxa ay keentay in ay dhalinyarada kale aysan la mid noqon oo eey aakhiradooda ka fakaraan, hilmaamka iyo

rayraynta dhalinta kale ku jiraana aysan ku mashquulin, haddii ey ku mashquuli lahaayeen waxaa u imaan lahayd ajasha ayaga oon diyaar ahayn, qubuurtooda hadda guryaha nuurka iyo iftiinka ahna waxay ahaan lahaayeen meel mugdi ah masaska iyo harraanadu ku hoyadaan. waxaan u rajaynayaa toban sano howsha ay qabteen in Alle ku dhaxalsiiyo boos wanaagsan oo janeed.

Maadaama cuddurada faaiidooyin saan ah keenaan, ma mudna in aan ka sheegano; waxay mudanyihiin in aan sabarno Allena aan ku tiirsano oona tala saarano.

DAAWADA TOBAN IYO AFARAAD

Bukaanka indhaha daahu ka saaranyahoow!

Haddii qofka mu'minka ah aragiisu daah uga aadsamo, ha ogaado daaha ku daahsoomay ishiisa in ay ka gadaaleyso iftiin iyo muuqaal wanaagsan. Kun jeerna Alle haku shukriyo. Arrintaan aan sheegay si ay u cadaato waxan idiin sheegayaa dhacdadaan igu dhacday:

Suleymaan wuxuu ahaa arday sideed sano si wanaag iyo ixtiraam ku jiro iigu qidmeynaayey.

Waxaa xanuunsatay eedadiis, oo ayaduna ahayd qof wanaagsan Allana ku xiran, indhahii ayey beeshay oo aragii baa ka tagay. Maalin anigoo masaajidka kasoo baxaya ayay ila kulantay, maadaama kheyr igu tuhmeysay darteed waxay i weydiisatay in aan Alle u baryo si arageedii ugu soo noqdo. Anigana camalkeeda wanaagsan dartiis Alle arageeda in uu u soo celiyo ayaan ugu duceeyay. Laba maalin kadib magaalada Burdur dhaqtar indhood ayaa ka yimid magaaladeenana yimid, indhaha ayuu u fiiqay aragiina waa u soo laabtay. Afartan maalin kadib ayaa aragii ka tagay, waana la oofsaday. Aad ayaan uga murgay waana u duceeyay alle ha u aqbalee.

Islaantaas afartan maalin beeraha Barla ku yaallo oo dhamaadka leh fiirsigooda waxay ku badalatay; qabrigooda, jannada beereheeda aan dhamaadka lahayn afartan kun oo maalin in ay fiirsato ayay ku guulaysatay. Maxaayeelay waxay ahayd qof iimaan leh oo wanaagsan.

Haa qof mu'min ah, aragga hadduu gabo sidaasna qabriga ku galo, waxa uu arkaa ahlu-qubuurta inta ay arkaan in kabadan. Sida dunida marka la joogo

sida anagu aan u aragno walxaha dunida yaala iyagana aysan u arkin oo kale. Qabriga ayaga oo ku jira ayaa janadda beeraheeda arkidoonan. Isha saasi ah daboolka saaran waxa ka hooseeya, samir iyo mahad celin. Daahana waxa ka faydi kara waa Qur'aanka xikmadda u saaxiibka ah.

DAAWADA TOBAN IYO SHANAAD

Bukaanka taahayoow!

Cudurka dushiisa sare inta fiiridid haka eed sheeganin! Xikmadda iyo ujeedkiisa fiiri alxamdulilaah dheh! Haddii xanuunka xikmadda laga leeyahay wanaag aheyn Alle dadka wanaagsan uu jecelyahay maku rideen. Sida xadiiskaan ku sugan:

أَشَدُّ النَّاسِ بَلَاءً-الْأَنْبِيَاءُ ثُمَّ الْأَوْلِيَاءُ-الْأَمْتَلُ فَأَلْأَمْتَلُ

Yacnii “ dhinaca dhibka la isku ibtileeyo marka laga fiiriyo,waxaa ugu daran nabiyaada,waxaa ku xiga awliyada, kadibna kuwa ku xigo” tusaale ahaan nabi Ayuub calayhi salaam iyo awliyadii alle iyo dadkii saalixiinta ahaa oo dhan waxay u arkeen xanuunada in ay cibaado yihiin, in ay hadiyo dhinaca Alle ka imaatay yihiin ayay u arkeen

wayna ku shukriyeen. Bukaankani taahayoow!
Haddii aad dooneysid dadkaas wanaagsan inaad ku
daysatid waa in aad ku sabartaa mahdisaana.

Haa, cudurrada qaar waxay sababikaraan geeri,
sida hooyoyinka umul raacdo, dabka iyo kuwa
biyaha ku hafta iyo kuwa daacuunka ku dhinta
waxaa la siiyaa darajada shahiid.

Sidoo kale cudurka iyo xanuunku , aduunya
jacaylka ayey yareeyaan mararka qaarna waxay
fududeeyaan ka tagida laga tagayo dhaldhalaalka
aduunka.

DAAWADA TOBAN IYO LIXAAD

Bukaanka mashaqada ka sheeganayoow!

Cudurku wuxuu qofka soo xasuusiyaa xurmada iyo
dhimrinta nolosha mujtamaca muhiimka u ah.
Sababtuna waa isku filnaasho iyo madax banaani
uu heestay ayaa dhamaata, waxaana xanaaneeya
dad mujtamaca ka mid ah markii uu xanuunsado.

إِنَّ الْإِنْسَانَ لِرَبِّهِ لَكَنَّاظِرٌ
إِن رَأَاهُ اسْتَعْتَبَ

Yacnii caafimaadku nafta xuni waxa uu
dareensiyaa in ay isku filantahay, walaaltinimada

iyo isu soo dhawaanshahana waxna uma aragto, sidoo kalena dadka xanuunka iyo dhibku haystana uma beer-jileecdo. Nafta xuni markuu xanuunku ku dhaco ayey dareentaa dhibka dadka xanuunsan haystay, una beer jileecdaa, haddii ey wax ku tarikartana way ku tartaa haddii aysan awoodina way u duceysaa wayna soo booqataa. Sidoo kale waxa ay wanaajisaa xariirka ay la leedahay dadka, waxayna ixtiraamtaa dadka la joogo iyo muddadii ay xanuunsaneed dadkii soo booqday.

DAAWADA TOBAN IYO TODOBAAD

Bukaanka xanuun dartiis wanaag samayn la'aanta ka sheeganayoow!

Alle u mahad naq, xanuunku waxa uu kuu furay mid ka mid ah irdaha kheyirka ugu baraxatiran. Xanuunku si joogto ah waxa uu ajar u yahay qofka xanuunsan iyo Alle dartii dadka ula jooga, sidoo kale waxa la aqbalaa ducadooda.

Haa, qofka xanuunsan in la caawiyo dadka iimaanka leh waxa lagu siiyaa ajar aad u weyn. Qofka xanuunsan sida uu yahay in la weydiiyo,

ayada oo aan la dhibeyn in lasoo booqdo waxay ka mid tahay sunada. Xadiiska waxaa ku sugan: “dadka xanuunsan ducadooda qaata, ducadooda waa mid la aqbaloo” haddiiba dadka xanuunsan dad waalidkaa ah ay yihiin in aad waxa ay u baahanyihiin u qabato, oo aadna niyadda u dhisto waa nuuc cibaadada ka mid ah oo lagaa ajarsiin doono.

Waxaa nasiib badan qofka hooyadiis iyo aabihii marka ay xanuunsanyihiin, qalbigooda dajiya ducadoodana qaata. Haa, nolosha mujtamaca booska uu ka joogo qofka waalidkii marka uu xanuunsanyahay u dhimriya una beer-jileeca waa heer sare kasoo liiska dadka kheyarka u saaxiibka ah magaciisa lagu qoro. Malaaigtuna “maashaa Allah, tabaaraka Allah” dhahdo.

Haa qofka marka uu xanuunsanyahay, xanuunku qofkuu hayo naxariis iyo daryeel dhibka ka kala yaraynkara in latuso wa wax aad u weyn. Qofka bukaanka ah ducadiisu in ay maqbuul tahay waa arrin muhiim ah. Muddo sodon ila afartan sano ah ayaa waxaa i hayey xanuunka roomatiisimaha murqaha, saas darteed waxaan Alle ka baryijiray

xanuunkan in uu iga qaado. Waxaan ogaaday xanuunka in aan duceysanno in naloo siiyey, saas darteed muddadaas sodonka ila afartanka sano ah ducada manan iska dhaafin. Qalbigeygana in uu ducada joojiyo muusan doonin.

Waqtiga xanuunku ku haayo waa waqtiga ducada aad la imaan lahayd; caafimaadkuna ducada natiijadeeda ma ahan, haddii Alle caafimaad ku siiyey waxa uu kaa siiyey waa fadligiisa iyo ixsaankiisa. Sidaa oo kale ducada ka dib sida eynu rabnay haddii aysan noqon macneheedu ma ahan in ducadeenii aan la aqbalin. Alle ayaa garanaya sida wanaagsan, wixii wanaag noo ah asaga ayaa garanayo nooguna deeqa. Mararka qaar duco aan aduunyo darteed ku weydiisano aakhiro waa noogu badali karaa deetana sidaas ayuu noogu aqbali.

Tabar la'aanta iyo liidashada xanuunka uu sababay waxay keenayaan, in ducadu saafi iyo Alle dartiis noqoto una badantahay ducadaasi in la aqbalo. Cudurku waxa uu sabab u noqday ducadan nadiifka ah. Qofka mu'minka ah ee buka iyo dadka la jooga oo gacanhayaba waa in ay ka faaiidaystaan ducadan qiimaha badan.

DAAWADA TOBAN IYO SIDEEAAD

Bukaanka mahad naqa joojiyey sheegashadana bilaabayoow!

Sheegasho, xuquuq aad leheed markaad weyso ayaa la sameeyaa, xaq aad leheed oo maqan ma jiro maxaad u sheeganaysaa. Waxaa laga yaabaa mahad celin waajib kugu ahayd in aadan samaynin kana gaabisay, adigoo xuquuq Alle jabisay ayaad xuquuq kale raadinaysaa. Dadka kaa caafimaad fiican inta fiiriso ayaad eed sheegasho bilaabaysaa. Waxaa laga yaabaa dadka kaa caafiimaad liito inaad fiiriso, cibradna ka qaadatid Allena aad u mahad naqdid in ay waajib kugu tahay. Gacantaadu haday jabantahay, gacmaha go'an fiiri! Hal il haday kaa maqantahay, dadka labada indhood kama maqan yihiin oo indhaha la' fiiri! Alle u mahad naq.

Haa, qofna dhanka nimcada dadka ka sareeyo inta fiiriyo kadibna eed shaagasho bilaabo xaq uma laha. Dhinaca musiibadana qofku waa inuu fiiriyo ogaadana iney jiraan dad dhinaca musiibada ka

daran kana musiibo badan, si uu Alle ugu mahad naqo.

Tusaale ahaan, qof dhibaataysnaa haddii minaarad inta la keeno fuul la dhaho, minaaraddana jaranjaradeeda tilaaba kasta uu kor u qaadana hadiyad uu ku farxo lagu gudoonsiiyo, hadiyadda ugu weyna minaaradda korkeeda ay ku sugayso, markii uu soo garay dhammaadka minaaradda meeshii laga sugaayay in uu ka mahad celiyo tallaabo kasta uu qaaday hadiyadihii la soo siyeey inta halmaamo uusan mahad celin, dabadeedna uu dhaho: minaaradani haday sii dheeraa lahayd, meel sare haday sii gaari lahayd, sida buurta oo kale ama minaaraddaa oo kale haday u dheeraa lahayd yiraahdo waxa uu ku takrifalay nimcadii la siiyey, qiimaheediina ma garan.

Allah dadka oon jirin ayuu abuuray, dhagax, geedo ama xoolana kama dhigin wuxuuna ka dhigay insaan garaad leh intaasna uguma ekeeynin waxa ugu daray diinta islaamka ah, noloshiisa badankeedna caafimaad ayuu siiyey, kadibna mararka qaar cudurro iyo xanuuno ku tusiyey in uusan u qalmin nimcooyinkaan, meesha uu ka

garanlahaa gafkiisa haddii uu dhaho “maxaan sameeyey kuna mutay tan igu dhacday?” waa nimcadii Alle ka hor imaansho, sidaas oo kale xanuunka haya hadduu sheegasho kusii darsado wuxuu la mid noqonaa qof gacanta uu ka jabnaa dagaal ku galay, ugana sii daray. Qofka garaadka leh halkii uu ka sheegan lahaa badalkeeda waxa uu dhaha

الَّذِينَ إِذَا أَصَابَتْهُمْ مُصِيبَةٌ قَالُوا إِنَّا لِلَّهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ

Alle ayuuna isku dhibaa talana saartaa, xanuunkana inta uu hayana wuu ku sabraa.

DAAWADA TOBAN IYO SAGAALAAD

Walaalka bukoow!

Nolosha haday markasta caafimaad ay ku joogi lahayd, waxaa yaraan lahaa qiimaha la siinayo. Dhadhanka nolosha dareenkeedana wuu yaraan lahaa, qofkuna waqtigu si uu isu dhaafiyo darteed waxa uu galayaa maaweelo iyo dhayal halmaamsiida nolosha.

Lakiin isbadalada iyo dhaqdhaqaaqu nolosha waxa ay ka dhigaan mid macno leh waqtiguna aad qaali u yahay, haddii dhibaato iyo xanuun haayo qofku

ma doonayo in waqtigu dhaqso u gudbo. “weli qoraxdii madhicin miyaa, habeenkii lama gaarin miyaa” inta dhaho caajis ma muujinayo.

Haddii qof aad u hanti badan, waqtiga uu nasiinada ku jiro haddii la weydiiyo lana dhaho “sidee tahay?” wuxuu dhahayaa “waqtigu ma socdo, aan ciyaar wada dheelno.” Ama “waqtiga si uu noo dhaafo aan wada damaashaadno” waxyaabo aan loo joogin ayuu kuu sheegi. Sidoo kale hididiilo dheeri ah oo haysa darteed waxa uu ku dhihi “noloshayda waxaa ka maqan aan u baahanahay waxaas iyo waxaas, haddii aan kaa haysanlahaa” in uusan dhimanayn aysan baahidiisu dhamaaneyn camal ayuu waxa ka maqan kuugu sheegayaa.

Haddii aad qof shaqaale ah iskana dan-yar oo caqli iyo iimaan leh aad u imaato asaga oo shaqadii loo dhiibay ku mashquulsan, kadibna aad weydiiso xaaladda uu ku suganyahay sida ay tahay, waxa uu dhihi “ Alle ayaa mahadda leh, waan fiicanahay, waan shaqaynayaa, waxaan jeclaan lahaa qoraxdu in aysan dhicin, si aan howshaan maantay u idleeyo. Waxkasta dhaqso ayay u gudbayaan, waxaan hadda ku jiraa mashaqo iyo dhib lakiin

way i dhaafi doontaa’’ asaga oo waqtiga sida uu ugu gaabanyahay ku dareensiinaya.

Sidaa darteed, shaqada iyo mashquulku waxay ku dareensiyaan nolasha qiimaheeda, nasiino iyo baagamuudeyna waxa ay nolosha ka dhigaan mid aan macna lahayn, qofkuna wuxuu doonaa in ay dhaqso dhamaato.

Musiibooyinka iyo xitaa dunuubta waxaa asal u ah waqti luminta iyo camal la’aanta kuwaasoo sababaya shar iyo gudcurkeeda, meel iska fadhiga iyo camal la’aantu qofka jiritaankiisa ayey baabi’iyaan waxa ayna qofka dareensinayaan jihawareer iyo mugdi. Dhaqdhaqaaqa iyo isbadalkana waxey keenaan farxad iyo mustaqbal ifaya.

Madaama dhartu saan tahay; xanuunkuna noloshaada dhadhan u yeelayo, awood u yeelayo, sidaa mid la mid ahna difaaca iyo habsami u socodka jirkaaga dib usoo celinaayo, shaqooyinkaasna muddo kooban in uu ku guto loo soo diray kadibna kaa tagi doono, inshaa Allah caafimaadkana dib ugu yeeri doono dhihina doona

booskaagii waa kan ee imoow, adiga ayaa iska leh gurigaan.

DAAWADA LABAATANAAD

Bukaanka cudurkiisa daawada u goobayoow!

Cudurku waa laba qeyb ama waa laba nuuc. Mid dhab ah iyo mid shaki ah. Midka dhabka ah Alle waxa uu xanuunkasta oo dhulka korkiisa saaran usoo dajiyey daawo. Cudurkasta daawo ayaa loo abuuray. Isku daaweyntiisa iyo isticmaalidiisana waa sharci laakiin in uu wax taro, caafimaadna keeno waxa laga sugayaa Alle oo kaliya, daawada wax ma caafiso Alle ayaa caafiyo. Cudurrada badankooda waxaa laga dhaxlaa cunto xumi, israaf iyo taxadar la'aan. Sidaas darteed dhaqtarka muslimka ah waxa uu kaaga digaa caafimaadkaaga waxa u daran. Sidoo kale israafka ayuu kaa reebayaa, dardaaran haddii aad raacdo ku bogsooneysid ayuu ku siinaya.

Haddii aan u imaano qaybta labaad oo ah cudurka shakiga ah, daawadiisa waa in aan ahmiyad aan la siinin, maxaa yeelay marka la siiyo wuu sii ballartaa. Haddii aadan muhiimad siinin wuu

yaraadaa, wuuna kaa joogsadaa. Sida shinnida camal, haddii aad ku mashquusho siday kuugu soo kor aruurayso, haddii aadan ku mashquulinna way kaa kala yaaci. Sida mugdiga dun cirbadeed ka dhex nuuxnuuxsanayso haddii aad ahmiyad siisid sida ay kuu baqo galinayso, xitaa waali ay ku gaarsin karto. Haddii aadan ahmiyad siinin waxaad arkee in ay dun lee tahay masna aysan ahayn. Kadibna waad ku qosli xaaladdaada.

Cudurkaan shakiga ah haddii uu qofka ku bato waxa uu dhaliyaa cudurka runta ah. Shakiga waa cudur dadka dhimirka dhib weyn ka gaarsiiya. Dhagaxa buur ayuu kuu tusaa. Awoodda macnawiga ah ayaa daciifta. Dhaqaatiir aan naxariis lahayn haddii aad ku soo aadidna, shakigu waa kugu si ballaaranayaa. Haddii aad qof hodan ah ahaydna waxaa kaaga lumaya xoolaha iyo hantidii aad lahayd, ama waxaad waynaysaa caafimaadkaaga oo dhan.

DAAWADA KOW IYO LABAATANAAD

Walaalka xanuunsanoow!

Cudurkan ku haya waxa uu kugu haaya xanuun loo jeedo, lakin waxaa xanuunka ka yaraynaaya waalidkaa iyo dadka aad jecleyde ood muddo aadan is arag ayaa ku soo booqanaya aadna arkaysaa. Taasina waxa ay kala qafiifidaa xanuunka, waxaadna sooxasuusanaysaa waqtiyaddaadi hore.

Sidaa o kale waxaad daryeel ka heleysaa dadka aad u shaqayn jirtay. Ood jeclaan jirtay in aan maamuus iyo heer wacan aad ka gaarto xagooda, waxaadna ka nasanaysaa shaqada aad haysaty muddo dheer. Ucdurka ku haya dartiis waxa aad heleysaa nasiino. Saas darteed xanuunka haddu saa kaaga yaraaday maha in aad sheegatid, waa in aad ka mahad naqdid.

DAAWADA LABA IYO LABAATANAAD

Bukaanka cudururrada culus qaboow!

Marka koowaad aan kuu bishaareeyo. Cuduradda cul-culus; sida cuuryanimoda iyo qalalkiba qofka mu'minka ah waxa ay barako. Arrintani waxaan ka maqlijiray dad salixiin ah, lakinn sababta maanan aqoon jirin, kadib ayaan gartay waana sidatan:

Dadka Alle uu jecelyahay, Alle inay u dhawaadaan, dunida dhibteedana ka badbaadan, akhiro say janno ey u helaan waxa ay raad-raaci jireen labadaan tilaabo:

Kow: dhimashada ayay xasuusan jireen. Dunida in ay marti ku hiyiin ayna ka bixi doonan ayay si dhab ah u rumaysiisey geeridu. Sidaa darteed waxa ay isku diyaariyeen nolosha akhiro oon dhamaadka lahayn.

Labaad: naftooda xumaha rabida badina waxa ay ku tarbiyeeyen dhbaatooyinki ku dhaca, waxayna meesha uga saareen xumaha ay naftoodu doonaysay.

Qofka bukaanka ah ee xanuunka culus haayoow! Ha halmaamin laba qodob oo dadka salixiinta ahba ku liibanen waad haysataa. Jirkaaga xanuunkan haya waxa uu ku xasuusinaa in aad dunida marti aad ku tahay, kana tagidoontid. Tan kale naftaada xumaha doonaysona xanuunku waxa uu u yahay cibroqaad xumahana ka celisa. Qodka cuduradan adag haayan hadii uu saan u fakaro waxa ka kala yaraanayo culayska iyo dhibka xanuunku ku hayo.

DAAWADA SADDEX IYO LABAATANAAD

Bukaanka cidlada dareemayoow!

Xanuunka ku haya dartiis dadka kugu hareereysanaa dhimrintooda iyo daryeelkooda haddii aad aad wehel ku dareentay. Maxaad u malaynaysaa Allaha suradihiisa qur'aanka oo dhan raxmaan iyo raxiim ku bilowday in uu naxariistiisa iyo dhimrintiisa kaa la maqnaado. Haddii aad Alle baridid una sheegatid dhibkaaga saga ayaa kugu filan, Alle haddii uu kula jiro wax kaa maqani ma jiraan.

Waxaa cidlo iyo kalinimo ku jirro qofka aan Alle isku dhiibin, aanaaminsanayna iyo qofkii aan muhiimad siniin Alle u cararka.

DAAWADA AFAR IYO LABAATANAAD

Qofka bukaanka dar-yeelayoow!

Hortiina waxaa taallo ganacsi akhiro aad faaidodiisa arkaysaan, ha iska dayicinina

fursaddaas.daddaal aad ganacsigaas ku heli lahaydeen muujiya.

Ubadka xanuunsani, waxa uu u yahay xanuunki layli iyo sii diyaarin nolosha aadka u adag ee dunida loo diyaarinayo. Sidaa oo kale xanuunka ubudka ku dhaca waxaa sawaab iyo ajar laga siiya waalidka dhalay oo caafimadka ubadkooda kooda ka doorta, siiba hooyada ubadka dhashay ayaa ajarka u badan la siiyaa.

Dadka waayeelka ahina in la daryeelo marka ay xanuunsanyihiin waxa ku suganaaday ajar iyo sawaab badan. Siiba qofka waalidkaa ahi haddii aad daryeesho marka uu xanuunsanyahay waxa aad ka heleysaa duco akhiro iyo dunidaba lagu arko raadkeeda. Taasiana waxa ay ku sugnaatay axaadista. Sidaa oo akle qofka waalidkiisa wanaajiya, marka ay xanuunsanyihiina daryeela dunida inta uu joogo waxa daryeela ubadka uu dhalay marka uu da' noqdo, qofka waalidkii aan wanaajinna waxa abaalkaa mariya dunida inta uu joogo dhalankiisa iyo ubadkiisa.

Qofka mu'minka ah hadduu arko qof xanuunsan qaraabadiisana uu san ka mid ahayn, maadama ajar

wayn uu ku sugnaaday daryeelka qofka buka, wuu ka faaidaystaa wuuna daryeela qofka xanuunku hayo asaga oon qaraabadiisa ka mid ahayn.

DAAWADA SHAN IYO LABAATANAAD

Walaalahayga xanuunsanayoow!

Haddii aad u baahantihiin daawo waxtar leh, xanuunkastana daawo u ah, imaankiina badiya. Danbi dhaaf dalba oo Alle u soo laabta, sidaa oo kale cibaadadiina xoojiya saa ayuu imaankuku kordhaaye. Imaanka daawo ahaan u isticmaala.

Imaanka waxa uu waxtar lee lahay marka cibaadoyinka faradka ah la sameeyo. Dunuubta iyo nafta xumaha jecel raacideedana wuu ku nusqaama. Xanuunku maadama moognaansha uu joojinaayo, nafta xumaha jecelna uu hor joogsanayo, waa in laga faaidaystaa.

Waxaan Allaha caafimadka hayo idinkaga baryayaa caafimad iyo cudurkani in uu danbi-dhaaf idinakga dhigo, amin amin amin!

وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي هَدَيْنَا لِهَذَا وَمَا كُنَّا لِنَهْتَدِيَ لَوْلَا أَنْ هَدَيْنَا
اللَّهُ لَفَدَّ جَاءَتْ رُسُلُ رَبِّنَا بِالْحَقِّ

سُبْحَانَكَ لَا عِلْمَ لَنَا إِلَّا مَا عَلَّمْتَنَا إِنَّكَ أَنْتَ الْعَلِيمُ الْحَكِيمُ
اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى سَيِّدِنَا مُحَمَّدٍ طِبِّ الْقُلُوبِ وَ دَوَائِهَا وَ عَافِيَةِ
الْأَبْدَانِ وَ شِفَائِهَا وَ نُورِ الْأَبْصَارِ وَ ضِيَائِهَا وَ عَلَى آلِهِ وَ صَحْبِهِ
وَ سَلِّمْ